Xeer sharci: Magacaabis 12 1999

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

## لولاية أرض بونت الصومال


Sanndka Iaad Garoowe 1 Sebtembar 1999 L.9

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntland Soomaaliya

---

**Qiimaha:** waa Sh. So_10.000 lambar walba. **Rukunka** Sannadkii waa Sh. So_170.000 dalka gudihiisa, dibeddana waa ShSo _500.000_ Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowdaa 1da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh. So_3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la weydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


---

### TUSMADA

Qeybta Koowaad

**SHARCI**


- Sharci Lam. 1 ee 31.03.199, ............ "Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha laxiriirsan" ............ Bogga 2
- Sharci Lam. 2 ee 14/4/1999 ............ "Nidaamka Garsoorka" ......... Bogga 10


Qeybta Labaad

**XEER**


- Xeer – Hoosaadka Golaha Wakiilada Puntland. ............ Bogga 15
- Xeer Madaxweyne Lam. 1 ee 16 Agoosto 1998 dhismaha Wasaaradaha Dowladda Puntland iyo magacaabidda Wasiirada dowladda. ............ Bogga 24

- Xeer Madaxweyne Lam.2 ee 12 Sebtember 1998 magacaabidda Agaasimayaasha Guud, Xubnaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Puntland..........Bogga__ 26

- Xeer Madaxweyne Lam.3 ee 13 Sebtember 1998 magacaabidda howlwadeeno Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Kaluumeysiga, Dekedaha iyo Kheyraadka Dabiiciga ah..........Bogga__ 29

- Xeer madaxweyne Lam.4 ee 6 December 1998 magacaabidda Agaasimayaasha Waaxyaha Wasaaradaha iyo Maamulayaasha Gobollada iyo Degmooyinka.......... Bogga____ 30

- Xeerka Madaxweyne Ku-Xigeen lam.6 ee December 12.1998 Magacaabida Maamulayaal Degmooyin.......... Bogga____ 35

- Xeer sharci lam.11 ee 6 Marso1999 dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DawladdaPuntland..........Bogga__ 36

- Xeer Madaxweyne Lam 12 ee 7 Marso 1999 magacaabidda Garyaqaanka guud ee dawladda ..........Bogga_ 38

- Xeer__ Sharci lam 43 ee 1Agoosto1999 Aasaasidda faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Puntland Soomaaliya.......... Bogga_ 39

## QAYBTA SADDEXAAD

<u>Talooyin, Isgaarsiin, Ogeysiis iwm</u>

Waxba ma leh;

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*Xafiiska Madaxweynaha*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

*Office of the President*

---

Xeer-Sharci Lam. MW/DPS/12/99
Magacaabidda Garyaqaanka Guud ee Dawladda

## MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND

**MARKUU ARKAY:** Axdiga Dawladda Puntland qod. 17.2;

**MARKUU ARKAY:** Xeer-sharci lam.MW/DPS/11/99 ee lagu dhisay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Go'aankii ka soo baxay Golaha Wasiirada fadhigiisi 25ka Feb. 1999ka;

**MARKUU U ARKAY:** Lagama maarmaan in loo magacaabo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, Garyaqaan Guud mas'uul [illegible], maamulka iyo fulinta waajibaadka loo asaasay Xafiiskaas;

**MARKUU XAQIIQSADAY:** In Dr. Avv. Yuusuf Jibril Caris uu xilkaas ku habboon yahay;

### WUXUU SOO SAARAY:

Xeer-Sharciga soo socda;

**Qod. 1aad**

Dr. Avv. Yuusuf Jibril Caris waxaa loo magacaabay Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

**Qod. 2aad**

Darajada Garyaqaanka Guud ee ku tilmaaman qodobka 1aad ee Xeer-Sharcigaan waa heer Guddoomiye hay'ad madax-banaan, marka laga eego dhinaca dhaqaalaha.

**Qod. 3aad**

Xeer-Sharcigaanu wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 25ka Febraayo 1999ka, waxaana loo gudbinayaa Golaha Wakiiladaa si sharci loogu rogo, waxaana lagu soo saari-doona faafinta rasmiga ah ee Dawladda,

Garoowe, Maarso 7, 1999

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda